# *UNUGGA XIRIIRKA KOMUYUUNATIGA*

**QEYBTA BOOLISKA ee COLUMBUS • XAFIISKA JAWAABAHA ISTARAATEJIGA AH**

## Macluumaad ku saabsan Weerarka Galmada, Shaqaaqada Guriga, iyo Dabagalka

## Hordhac:

Weerarka Galmada, Shaqaaqada Guriga, iyo Dabagalku waa falal loogu talagalay in lagu handado, waxyeeleeyo, bah-dilo, xukumo oo lagu kantaroollo qofka kale. Haddii ay arrin sidaas ihi adiga kugu dhacday, waxa muhiim ah inaad xasuusato in wax kasta oo aad sameysay ama aanad sameyn, aanay taasi ahayn mid ku timi khalad aad sameysay oo aad galabsatay. Eedda waxa iska leh qofka sidaas adiga kugu sameeyey; adigu uma qalantid oo maad weydiisan in sidaas lagugu sameeyo.

**Haddii aad ahayd dhibbane dembi weyn, waxa aad leedahay xuquuq.**

Macluumaadka hoos ku qoran waxa loogu talagalay inu hage aasaasi ah u noqdo dhibbanayaasha dembiga weyn ee gacan saarka ah ee degmada Franklin County. Weerarka galmada, shaqaaqada guriga iyo dabagalku waa dembiyo gacan saar ah oo laga galo haweenka, ragga iyo ilmaha.

Dhibbanayaasha dembiga weyn waxay inta badan ka cabsadaan inay ka hadlaan wixii ku dhacay. Waxa laga yaabaa in aanay hubin sida uu u shaqeeyo nidaamka maxkamadduhu, ama waxa laga yaabaa inay ka cabsanayaan waxa ku dhici doona iyaga, qoysaskooda, ama dembi falaha. Inkasta oo arrimahaasi ay yihiin cabsiyo caadi ah, waxa jira goobo aad caawimo ka raadsan kartid haddii aad tahay dhibbane dembi weerar galmo, shaqaaqo guri ama dabagal ah.

Waxa intaas dheer, wakaaladaha halkan lagu taxay waa kuwo aad u qaddariya arrimaha dhaqanka oo khibrad u leh inay la shaqeeyaan dadyow kala duwan. Iyagoo ixtiraamaya sharciga, waxay isku dayi doonaan inay adiga ku siiyaan adeegyo ama ay kuu diraan barnaamijyo fahmaya xaaladdaada.

Dhibbane ahaan waxa laga yaabaa inaad u qalantid inaad mag-dhow ka heshid Barnaamijka Mag-dhowga Dhibbanayaasha Dembiyada ee Ohio. Wixii macluumaad dheeraad ah, si toos ah ula xiriir barnaamijka.

**Xasuusnow - adigu mas'uul kama tihid dhaqanka dembi falaha oo ma kantarooli kartid dabeecaddooda.**

**Qeeximo Aasaasi ah:**

**Weerar Galmo**: Weerarka galmadu wuxuu dhacaa marka qof kale uu adiga kugu qasbo inaad la galmooto adiga oo aan rabin inaad sidaas sameyso (oo aan oggolaanin).

**Shaqaaqo Guri**: Shaqaaqada gurigu waxay dhacdaa marka uu seygaaga ama afadaada, ama lamaanahaaga qalbiga, ama xubin ka mid ah qoyskaaga ama gurigaaga uu adiga kugu handado kalmado iyo/ama hub, oo uu isku dayo inuu kuu geysto ama uu kuu geysto waxyeello jireed (Sida: garaac, dhirbaaxo, feer, laad, qaniinyo ama ceejis).

**Dabagal**: Dabagalku wuxuu dhacaa marka qof kale si joogta ah u soo galo xadkaaga shakhsiyeed ee gaarka ah. Ficilladaas lagu celceliyaa waxay adiga kuu keeni karaan dhibbaato maskaxeed

iyo/ama cabsi waxyeello jireed (Sida: marka ay ku dabagalaan, ku wacaan, ama ay si joogta ah kuula soo xiriiraan).

Dhammaan waxyaalaha kor ku qoran waxa loo yaqaannaa inay yihiin dembiyo gacan ka hadal ah. Haddii aad tahay dhibbane mid ka mid ah dembiyaddan ama dembiyo kale oo gacan ka hadal ah, waxaad hubisaa inaad qof ahaan aad amaan tahay oo waxaad wacdaa lambarka 911. Haddii aad dhaawacantay, daawo raadso.

**HADDII AAD AHAYD DHIBBANE WEERAR GALMO**

Xannaano daawo ka raadso waaxda caafimaadka degdega ah ee dhaawacyada ku soo gaaray ( ama aanad oggeyn inay ku soo gaareen). Shaqaalaha waaxda caafimaadka degdega ah wuxuu ururin karaa caddeymo jireed, oo waxay qori karaan wixii dhaawac ah haddii aad adigu rabtid in sidaas la sameeyo.

Waaxyaha caafimaadka degdega ah intooda badani waxay siiyaan adeegyo dhammeystiran iyo taageero dhibbanayaasha weerar galmo. Waaxyaha caafimaadka degdega ah intooda badani waxay leeyihiin Kalkaaliyaal Baare Weerar Galmo (SANE), kuwaas oo si gaar ah loogu tababaray maaddada kalkaalinimada baarista caddeymaha dembiyada iyo ururinta caddeymaha, iyo u-doodayaal mutadawiciin ah, kuwaas oo ku takhasusa inay taageeraan ka badbaadayaasha weerarka galmada. Labadaasiba waxay adiga kaa caawin karaan inaad martid baroosaska cisbitaalka.

Si loo helo naatiijada ugu fiican ee ururinta caddeymaha: HA meyran, farajka/hoosta biyo xoog leh ha ka ku meyrin, ha cadayan ilkahaaga, ha cabin sigaar, ama ha bedelin dharkaaga ka hor inta aadan aadin cisbitaalka. Haddii ay qasab noqoto inaad dharka beddelato, waxaad soo qaaddaa dharkii aad gashaneyd xilligii adiga lagu weeraray.

Haddii aad tahay dhibbane weerar galmo, waxaad la xiriirtaa telefoonka Caawimada ee 24-Saac ee  Xiriirka Ka-jawaabka Weerarka Galmada ee Bartamaha Ohio (SARNCO) ee (614) 267-7020, ama waxaad si bilaash ah u wacdaa Xiriirka Qaran ee Kufsiga, Faraxumeynta & Galmada Qaraabada (RAINN) ee 1-800-656-HOPE.

**HADDII AAD AHAYD DHIBBANE SHAQAAQO GURI**

Haddii aad ahayd dhibbane shaqaaqo guri, waxaad wacdaa booliska oo la xiriir telefoonka 24-Saac & Gabboodka ee xafiiska "CHOICES" ee (614) 224-4663 ama Unugga Shaqaaqada Guriga iyo Dabagalka ee Xafiiska Dacwad-ooggaha Magaalada Columbus, (614) 645-6232, Isniin - Jimce 8:00 subax - 4:30 galab. Waxa laga yaabaa inaad gabbood ama guri ku meel gaar ah aad ka heshid CHOICES.

Adiga amaankaaga iyo amaanka ilmahaaga ayaa ka muhiimsan wax kasta oo kale. Haddii aad ka cabsi qabtid inuu lammaanahaagu wax ku yeello - Waxaad sameysataa qorshe amaan ah:

- Waxaad sii qorsheysataa meel kale oo aad tagtid haddii lammaanahaagu ku handado ama uu ku dareensiiyo in aanad amaan ahayn. U tag dariska, saaxiib ama xubin qoyska ah oo aad ku kalsoon tahay inuu ku caawin karo adiga iyo ilmahaaga.
- Calaamadso albaab ama daaqad aad si degdeg ah oo amaan ah uga bixi kartid si aad u baxsato.

- Ha ka hor iman ama ha isku taagin lammaanahaaga haddii uu/ay sarkhaansan yahay/ sarkhaansan tahay ama uu daroogeysan yahay/ daroogeysan tahay.

- Waxaad isku deydaa inaad meel dhigatid lacag kaash ah, dhar dheeraad ah, furayaal dheeraad ah ee guriga iyo baabuurta, iyo wixii dhokumanti muhiim ah ee adiga iyo qoyskaaga (Sida: kaaraka 'social security'ga, shahaadadaha dhalashada, dhokumantiga furitaanka, baasaboorada, fiisooyinka iyo waraaqaha xafiiska socdaalka). Haddii aad u baahatid inaad guriga si degdeg ah uga baxdid, ka fakir meesha aad si amaan ah ugu heyn kartid alaabooyinkaas (malaha guriga saaxiibkaa, qaraabadaada ama dariskaaga).

**HADDII AAD AHAYD DHIBBANE DABAGAL**

- Waxaad wacdaa booliska oo warbixin qor mar kasta oo wax dhacaan.

- La xiriir Unugga Shaqaaqada Guriga iyo Dabagalka ee Xafiiska Dacwad-ooggaha Magaalada Columbus, (614) 645-6232, Isniin - Jimce 8:00 Subax - 4:30 Galab.

Kiisaska dembiyada waaweyn ee Degmada Franklin County waxa lagu dhageystaa laba maxkamadood midkood:

- Maxkamadda Dawladda Hoose ama Munishiibiyada ee Degmada Franklin County - maxkamaddani waxay mas'uul ka tahay kiisaska yaryar (misdemeanor cases).

- Maxkamadda Degmadda Franklin County ee Cabshooyinka Caadiga ah - maxkamaddani waxay mas'uul ka tahay dembiyada waaweyn (felony cases).

Haddii aanad hubin inaad tahay dhibbane dembi yar ama dembi weyn, waxaad wici kartaa mid ka mid ah labada xafiis ee dacwad-ooggaha ee halkan ku taxan. Waa inaad heysataa magaca eedeeysanaha ama lambarka kiiska marka aad waceysid.

**Waxaad heli kartaa u-doode sharci ama caawiye dhibbane marqaati ah oo adiga kaa caawiya maridda dhammaan baroosaska maxkamadda.**

**WAA MUHIIM:**

- Mar kasta dhar habboon u soo xiro maxkamadda! Haddii aad shakidid, wac dacwad-ooggahaaga ama caawiyahaaga dhibbane marqaati ah.

- Isku dey inaad heshid qof ilmaha kuu haya marka aad maxkamadda ku jirtid, ama waxaad keensataa qof adiga ilmaha kula haya. Xaakinnada qaarkood ilmaha uma oggola inay maxkamadda soo galaan. Waxa intaas ka sii muhiimsan in macluumaadka qaarkiis lagaga hadlayo maxkamadda dhexdeeda ay ilmaha wax yeeli karaan.